

# Tallaalka Janssen oo la dooran karo

Waxay dawladdu go'aamisay in tallaalka Janssen dadka la siiyo asaga oo aan ku jirin barnaamijka tallaalka koroonaha. Laga billaabo 15-ka juun waxaa ballan laga qabsan karaa dhakhaatiirta barayfatka ah, goobaha tallaalka iyo dhakhaatiirta joogtada ah ee tallaalka bixiya.

Dadka doonaya in ay qaataan tallaalka Janssen, waxaa lagula talinayaa ka hor inta aysan dhakhtar la xiriirin in ay marka hore galaan bogga [helsenorge.no](https://www.helsenorge.no) oo akhristaan macluumaadka tallaalka iyo cidda la siin karo.

– Dawladdu waxay qabtaa in ay sax tahay in tallaalku noqdo mid ay dooran karaan dadka shuruudaha buuxsha. Caadi ahaan waxaan dadka kula talinnaa in ay qaataan tallaallada barnaamijka tallaalka, laakiin dadka qaar baa lahaan kara sababo wanaagsan oo ay u doonaan tallaalka Janssen, ayuu yiri Bent Høie, oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Tallaalka Janssen waa laga aqoonsaday Xafiiska daawada ee Yurub (EMA), wuuna ku jiraa barnaamijka tallaalka ee dalalka Yurub intooda badan. Tallaalka hal mar uun baa dadka lagu duraa, taas oo keenaysa in uu qofka lagu duro noqonayo mid tallaalka buuxa qaba saddex toddobaad kaddib marka la tallaalo.

## **Agaasinka caafimaadku wuxuu qabaa in tallaalka la qaadan karo xaaladaha soo socda:**

- Safarrada lagama maarmaanka ah ee lagu tagayo dalalka uu cudurku ku badan yahay ama meelaha uu dhakhtarku u arko in faa'iidada tallaalka Janssen ay ka badan tahay halistiisa.
- Dadka tallaalka-la'aanta awgeed ku sugan xaalad nololeed oo adag oo ay noloshooda iyo caafimaadkoodu halis ku jiraan inta ay tallaalka kale sugayaan.

- Marka uu xubin qoys oo soke qabo kansar halis ah, ama xubin qoys oo soke la siiyo daawo kale oo hoos u dhigeysa difaaca jirka – oo dhakhtarku u arko in faa’iidada tallaalka Janssen ay ka badan tahay halistiisa.
- Marka dhakhtarku u arko in uu jiro xanuun nafsigan ah oo weyn, in noloshu khatar ku jirto ama ay tayada noloshu si weyn u wiiqanto kuwaas oo ay keeneen muddo dheer oo dadka gooni looga baxay iyo rajiiim tillaabooyin adag oo lagu jiray.
- Waxaa kale oo jiri kara in marar inta qiimayn gaar ah lagu sameeyo caafimaadka qofka markaasna uu dhakhtarku asaga oo ku salaynaya qiimaynta iyo aqoonta uu u leeyahay xaaladda nolosha ee qofka, uu u arko in faa’iidada qofku tallaalka ka helayo ay ka badan tahay halistiisa. Tan waa in lagu saleeyaa xaaladda nolosha ee qofka gaarka ah.

– Kuwani waa shuruudo adag oo keeni kara in dhakhtarku u diido dad tallaalka doonaya, ayuu yiri Bent Høie, oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

## **Dhakhaatiirta khasab kuma aha in ay tallaalka baxshaan**

Dhakhtarka ayaa go’aanka ugu danbeeya gaaraya in bukaanka la siinayo tallaalka Janssen iyo in kale. Bukaanku xaq buu u leeyahay in uu saameyn ku yeesho go’aanka, laakiin ma dhihi karo waa in tallaalka la i siiyo. Tallaalka iyo tallaalistuba waa bilaash. Waxaa weli jira caddad go’an oo dhakhaatiirta lagu siiyo tala-siinta iyo tallaalidda.

– Dhakhaatiirtu kuma khasbana in ay dadka ku tallaallaan tallaalka Janssen, laakiin waxay dawladdu samaysay nidaam - dhakhaatiirta joogtada ah, dhakhaatiirta barayfatka ah iyo goobaha tallaalka safarka - haddii ay doonayaan u oggolaanaya in ay tallaalka bixin karaan. Dhakhtarka ayaa si gaar ah u qiimaynaya in ay caafimaad ahaan sax tahay in tallaalka la siiyo qofka dalbanaya, ayuu yiri Høie.

Waxaa qiimaynta qayb ka ah waxyeellooyinka waaweyn ee dhifka ah ee tallaalka Janssen, xaaladda gaarka ah ee qofka, xaaladda cudurka ee Norway iyo in wixtarka tallaalka Janssen loo arko mid xoogaa ka hoosaysa tallaallada kale ee

barnaamijka tallaalka. Qodobbada gaarka ah ee tallaalka ee Xeerka dhaawacyada bukaanka ayaa la dabakhayaa.

## **Dawladda ayaa kharashka bixinaysa**

Xarummaha dhakhaatiirta ee bixiya tallaalkan waxaa lagu boorinayaa in ay warbixin ku daabacaan barahooda internetka ama baraha internetka ee degmada, si ay dadka tallaalka doonaya ugu fududaato sidii ay ku ogaan lahaayeen cidda ay la xiriirayaan.

Dhakhaatiirta doonaya in ay tallaalkan dadka siiyaan waxay ka dalban karaan bogga internetka ee Machadka caafimaadka dadweynaha.

Tallaalka iyo tallaalistu waa bilaash, kharashka oo idil na dawladda ayaa ku bixinaysa caddad go'an. Sharci ma aha in ay dhakhaatiirtu lacag dheeri ah ku qaataan duridda tallaalkaan.

Norway tallaal oo dhan ikhtiyaari ayaa loo doortaa. Barnaamijka tallaalka ayaa ka hor billowga bisha ogoosto tallaalis u fidin doona dhammaan dadka Norway ee 18 sano ka weyn. Waxaa dadka lagu tallaalayaa tallaallada BioNTech-Pfizer iyo Moderna. Fursadda lagu qiimaynayo in qofka si ka baxsan barnaamijka tallaalka loogu duro tallaalka Janssen, ayaa sidaas darteed ah mid doorasho ku salaysan.

## **Warbixin dheeraad ah:**

- [Warbixin dadweynaha loogu tala galay Helsenorge.no](https://www.helsenorge.no)
- [Hagista shaqaalaha caafimaadka ee ku jira bogga Agaasinka caafimaadka](#)
- [Loogu tala galay dhakhaatiirta: Warbixinta Machadka caafimaadka dadweynaha ee dalbashada tallaalka Janssen](#)